

# Leenka METRO B

## Gaadiidka degdega ah wuxuu imanayaa Waddada 21

Dhismaha Leenka METRO B ee mashruuca Bus Rapid Transit ayaa bilaabmay 2023 Leenka B wuxuu si weyn ugu beddeli doonaa Jidka 21 isagoo ku bixinayo adeegyada maalinta dhan ah si ka dhaqsa badan oona joogto ah. Leenkan 12-ka mayl ah wuxuu isku xiri doonaa qaybaha kala duwan ee Minneapolis iyo St. Paul, taasoo sahlaya isu socodka dhexdooda Bus rapid transit waxa uu safarkaaga baska ka dhigaa mid dhakhso badan oo xiiso leh isagoo ku samaynayo horumarino kala duwan.

Leenka B wuxuu hubin doonaa in qof walba uu ka helo adeeg cadaalad ah oo loo siman yahay aag ay dad badani ka isticmaalaan gaadiidka dadweynaha, xitaa marka uu jiro cudur safmar ah.

### Safar dhakhsa badan

Hadafka Leenka B waa in laga dhigo adeega mid ka dhakhsa badan ku dhawaad 20%. Waa kan sida:


- Basasku u yareeyaan joogsigooda, iyagoo si weyn u dedejiya wakhtiga safarka.
- Mashinada tigidhada ee yaala boosteejooyinka ay ugu oggolaadaan macaamiisha inay iibsadaan tigidhada ka hor intaysan la fuulin gaarig lacag caddaan ah ama kaarka kiridhitka.

- Basaska sagxadoodu gaaban tahay iyo jid gooyaha dhaadheer ee ku yaala boosteejooyinka, iyo albaabada baska ee ballaaran iyo ka soo fuulida qaybta hore iyo qaybta danbe, u dedejiyaan fuulitaanka.
- Kor u qaadida jid gooyada booteejada ay u beekhaamuso wakhtiga; basaska waxay si fudud u gali karaan wadada ka dib markay ku adeegaan boosteejo.
- Mudnaanta calaamadda iyo jidadka baska kaliya u gaarka ah ee meelaha muhiimka ah ay u oggolaadaan basaska inaysan istaagin.

**Ka dhigista safarka mid wanaagsan** Hoyga joogsiga baska ee la horumariyay ayaa bixiya meel nabdoon oo ammaan ah oo lagu sugo baska, layskagana difaaco cimilada xun. Waxyaabaha uu qabo waxaa kamid ah:

- Meelaha la gashado baaskilada
- Macluumaadka ku saabsan jidka, nidaamka gaadiidka iyo aaga ku xeeran
- Kamaradaha amniga iyo taleefannada loo isticmaalo xaaladaha degdega
- Iftiin la horumariyay
- Badhan la riixo marka diirimaad loo baahdo

**Ka eeg khariidad faahfaahsan barta [metrotransit.org/b-line-project](https://metrotransit.org/b-line-project)**



**CIDA LAGALA XIRIIRAYO MASHRUUC:**  
Cody Olson  
[cody.olson@metrotransit.org](mailto:cody.olson@metrotransit.org)  
612-248-0642

**Metro Transit**  
[metrotransit.org/b-line-project](https://metrotransit.org/b-line-project)

## Jadwalka Mashruuca (waa la bedeli karaa)

• 2020	• 2021-2023	• Guga 2023	• Guga 2024
Goobaha boosteejada la ansixiyay	Naqshada boosteejooyinka iyo dayactirada kale	Dhismuhu wuxuu ka bilaabmayaa bariga Hiawatha Avenue	Dhismuhu wuxuu ka bilaabmayaa galbeed Hiawatha Avenue

## Waxa laga filan karo dhismaha

Metro Transit waxay uga mahadcelinaysaa dadka deegaanka, ganacsatada iyo macaamiisha inay dulqaad muujiyaan inta shaqaaluhu ay ka shaqaynayaan sidii ay Leenka B ay ugu diyaarin lahaayeen in la furo. Inta lagu jiro dhismaha, waxaa jiri kara waqtiyo ay waddooyinka xiran yihiin oo ay tahay inaad marto waddooyin kala duwan, waxaa laga yaabaa in qaybo ka mid ah meelaha ay dadka ku lugeeyaan in la xiro, waxaana dhici karta in mararka qaarkood ay dhacaan dhawaaqyo cod dheer ah. Dadku waa inay saadaaliyaan saamaynadan soo socda:

- Marka aan ka shaqeyno boosteeja kasta oo ay waddooyinku ku kulmaan, waxaan inta badan ku dari doonaa qaybo cusub wadada iyo qaybta dadka ku lugeeyaan. Waxaan sidoo kale wax ka beddeli doonaa nalalka taraafigga waxaana dhisi doonaa hoy iyo alaab cusub.
- Waxaan dhisi doonaa waddooyinka lagu lugeeyo oo wanaagsan iyo calaamado taraafiko in ka badan 50 isgoys.
- Goobaha qaar waxa kale oo ku jiri doona shaqada tasiilaadka iyo hagaajinta meelaha ay dadka ku lugeeyaan ama meelaha lagu wado baaskiilka.
- Si waddooyinka loo wanaajiyo, waxay hagaajin doonaan Lake Street iyo Lagoon Avenue.
- Si basaska looga dhigo mid dhakhsa badan oo la isku halayn karo, leeman gaar ah oo basaska loogu talagalay ayaa lagu dari doonaa qaybo ka mid ah Lake Street, Lagoon Avenue, iyo Marshall Avenue.
- Shaqaaluhu waxay gelin doonaan tuubooyinka dhulka hoostiisa si ay u sameeyaan dariiq loogu talagalay xiriir internet oo gaar ah. Dariiqan ayaa isku xiri doona dhammaan tignoolajiyada cajiibka ah ee boosteejooyinka tareenka iyo inuu ku jiro jidka.
- Minneapolis, waxay dhisi doonaan dhisme si Lake Street had iyo jeer u lahaato gawaari u socota labada jiho, iyo gaadiidka sidoo kale waxay ku qulquli karaan qaybaha Lake & Lagoon ee Uptown.
- St. Paul, waxay qabanqaabinayaan dhismaha Marshal Avenue si ay baabuurta u maraan labada dhinac mar kasta. Selby Avenue, qaybo ka mid ah waddooyinka ay ku kulmaan ayaa gebi ahaanba laga xannibi doonaa baabuurta muddo bil ah, waxaana jiri doona waddooyin gaar ah oo aadan isticmaali karin muddo intaas ka dheer.
- Kooxda wacyigelintu waxay la hadli doonaan dadka ku nool, ka shaqeyya, ama hantida ku leh aagga wax yar ka hor inta aanu dhismuhu ka bilaabanin meel cusub.
- Had iyo jeer waxaanu u oggolaan doonaa ugu yaraan hal dhinac oo ka mid ah goobta dhismaha inay dadka ku lugeeyaan.
- Waxaa loo oggolaan doonaa inay dadka u maraan guryahooda iyo ganacsiyadooda.
- Inta lagu jiro dhismaha, basasku waxay u baahan doonaan inay maraan waddooyin kala duwan. Macluumaadka cusub waxaa laga heli karaa [metrotransit.org/alerts](https://metrotransit.org/alerts). Rukumo digniinada Rakaabka si aad si fudud ula socoto isbeddelka dariiqa baska iyo meelaha joogsiyada ku meel gaadhka ah.

### Ahoow xog ogaal

Wixii ku saabsan macluumaad guud ee mashruuca:

[metrotransit.org/b-line-project](https://metrotransit.org/b-line-project)

Si aad u hesho tafaasiisha akhbaaraad ku saabsan isbeddelada ku yimaadda jidada baska:

iska qor Digniinada loo soo diro Rakaabka barta [metrotransit.org/alerts](https://metrotransit.org/alerts)

Macluumaadkii ugu dambeeyay ee ku saabsan dhismaha:

Iska qor [akhbaaraadka Leen B ee layskugu soo diro iimaylka](https://metrotransit.org/alerts)

**Nala soo xiriir haddii aad qabtid wax walaac ah ama su'aalo ah**

Khadka lagala xiriiro qolada dhismaha:

651-356-6995

iimaylka wacyigelinta:

[BLine@metrotransit.org](mailto:BLine@metrotransit.org)

Ma u baahan turjubaan?

Español, Hmoob, Soomaali, Oromoo, Karen

• Wac 612-373-3333, Dooro Xulashada 2

• Sheeg luuqada: Español, Hmoob, Soomaali, Oromoo, Karen